

Xaqiiqda Cudurada Galmada (STD)

Hepatitis: Type B-Som

Cagaarshow (Joonis): Nooca B (oo uu keeno fayraska loo yaqaan hepatitis B)

CALAAMADAHA LAGU GARTO

Calaamadaha Cagaarshow-ga Nooca B:

- Waxay bilawdaan 45-180 maalmood ka dib marka cudurka la qaado
- Waxay la mid yihiin kuwa cagaarshow-ga A
- Murqaha iyo kala goysyada oo xanuuna

ISU GUDBINTA

Cagaarshow-ga Nooca B waxaa Fidiya:

- Galmada caadiga ah
- Galmada aan caadiga ahayn
- Iyadoo la wadaago cirbadaha loo adeegsado daroogada la isku duro, kuwa loo adeegsado biraha jirka la suro (body piercing) ama kuwa loo isticmaalo taatuuga (tattooing)
- Hooyo cudurka qabta oo u gubisa ilmaha dhalanaya
- Iyadoo la wadaago waxyaabaha qofka u gaarka ah (makiinadaha garka lagu xiiro, cadayga, ciddiyo gurtada, dhega dhagaha nooca la geliyo dhegaha duleelkooda)

DHIBAATOYINKA KA YIMAADA CUDURKAN

Cagaarshow-ga Nooca B:

- Wuxuu keeni karaa in beerka uu ku dhaco cudur joogta ah, cudurka loo yaqaan cirrhosis, kansarka beerka iyo dhimashaba
- Hooyo cudurka qabta waxay oo u gubin kartraa ilmaha dhalanaya
- Ilmahu wuxuu noqon karaa mid cudurku uuna ka muuqan laakiin cudur side ah (carrier)
- Cudur siduhu dadka kale wuu qaadiin karaa
- Dadka inka yar 1% ayaa u dhinta cudurkan waqtiga uu socdo lahankaca deg degga ah ee uu keeno cudurkani

KA HORTAGGA

Talooyin ku saabsan sida loo Yareeyo Fiditaanka Cagaarshowga Nooca B:

- Ha la wadaagin cidna cirbadaha loo adeegsado daroogada la isku duro, kuwa loo adeegsado biraha jirka la suro (body piercing) ama kuwa loo isticmaalo taatuuga (tattooing)
- Bacda galmada, marka loo isticmaalo si joogta ah saxna ah, waxay yarayn kartaa suurtagalnimada in cudurkan la isku gudbiyo

- Isticmaal bac galmo oo ku habboon markasta oo aad samaynayso galmo caadi ah ama aan caadi ahayn
- Yaree tirada dadka ay galmadu idinka dhaxayso
- Cidna ha la wadaagin waxyaabaha qofka u gaarka ah sida makiinadaha garka lagu xiiro
- Marka hooyo cudurka qabta ay umusho waa in ilmaha isla markiiba laga tallaala cudurka
- Waa in cagaarshawga B laga tallaalaa ilmaha yar yar, carruurta waaweyn, qaangaarka sameeya galmoodka iyo dadka kaleba

DAAWEYNTA

Sida Wax looga Qabto Cagaarshowga Nooca B:

- Daawada loo yaqaan immune globulin oo la isku duro 7 maalmood gudahood marka dhiig qaba cudurkani uu gaaro dhiigga qof kale ama 14 maalmood kadib marka galmood lala sameeyo qof qaba cudurkan, in cudurkan la iska tallaalana waa wax loo baahnaan karo

WIXII WARAR DHEERAADA, LA XIRIIR:

Infectious Disease Epidemiology, Prevention and Control Division
Minnesota Department of Health
P.O. Box 9441
Minneapolis, MN 55440-9441
(612) 676-5414; (612) 676-5653 TTY

Khadka Teleefonka ee Qorshaynta Qoyska iyo Cudurada Galmada (STD) ee Minnesota (Minnesota Family Planning and STD Hotline)
1-800-783-2287 Teleefonka caadiga ah /TTY

Khadka Taleefonada Hay'adda Qaranka CDC Qaybta Qaabilsan Cudurada STD iyo AIDS (CDC National STD and AIDS Hotlines)
1-800-227-8922 ama 1-800-342-2437
1-800-243-7889 TTY
1-800-344-7432 (Isbaanish) (Spanish)
www.ashastd.org

Khadka Teleefonka Hay'adda CDC Qaybta Qaabilsan Cagaarshowga (CDC Hepatitis Hotline)
(404) 332-4555